

WARBIXINTA SAFARKA RUUSHKA

01-05 Juun 2025



HORUDHAC

Wafdi ballaaran oo uu hoggaaminayo guddoomiyaha Aqalka Sare ee BJFS mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi oo casuumaad rasmi ah ka helay dhiggiisa guddoomiyaha Golaha Federaalka ee Baarlamaanka Dowladda Federaalka Ruushka Marwo Valentino Matvienko ayaa safar shaqo ugu ambabaxay magaalada Moscow ee ee Caasimadda Dalka Ruushka taariikh **01 Juun 2025**.



Guddoomiyaha iyo wafdigiisu waxaa si habsami leh ugu soo dhaweeyay gagida diyaaradaha caalamiga ah ee Vnokovo xubno ka tirsan Golaha Federalaka ee Baarlamaanka Dowladda Ruushka iyo Danjiraha dowladda Ruushka ee Soomaaliya Mikhail A. Golovanov iyo danjiraha Soomaaliya ee Ruushka Mudane Maxamed Abuukar Subayr.

UBAX DHIGGA DALJIRKA DAAHSOON EE RUUSHKA IYO BOOQASHADA KAYD/MATXAF DHAQAMEEDKA KREMLINKA MOSCOW



Subaxnimadii Isniinta 02 Juun 2025 Guddoomiyaha Aqalka Sare Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa dhagax dhigay daljirka daahsoon ee Ruushka, kaas oo ku yaalla dhinaca galbeed ee darbiga qasriga madaxtooyada ruushka ee Kremlin, kaas oo ah astaan u taagan xusuus iyo xushmad loo hayo askartii u geeryootay difaaca Dalka Ruushka.



Intaas ka dib, Guddoomiyaha iyo wafdigiisu waxay u dhaqaaqeen booqashada kayd/matxaf dhaqameedka Kremlinka Moscow, waana matxaf/kayd dhaqameed qani ku ah dhaxal dhaqameedka iyo hantida taariikheed ee Ruushka. Waxaa lagu soo bandhigaa taajyo, dhar boqortooyo, hub, gaadiid la isticmaali jiray qarniyo kala duwan iyo hadiyado boqortooyo, dheemanno iyo dahab iyo dhagaxaan qaali ah.

KULANKA GUDDOOMIYAHA AQALKA SARE IYO GUDDOOMIYAHA GOLAHA FEDERAALKA EE BAARLAMAANKA RUUSHKA

Galabniimadii Isniinta **02 Abriil 2025**, Gudoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyo wafdigiis la socday waxay kulan mira dhal ah kula qaateen xarunta Golaha Federaalka Guddoomiyaha Golaha Federaalka ee Baarlamaanka Dowladda Ruushka Marwo Valenitno Matvienko iyo xubno ka tirsan Guddiga Joogtada ah ee Golaha Federaalka, Safiirrada labada Dowladood ee Soomaaliya iyo Ruushka.



Waxayna si qoto dheer uga wada hadleen xaaladda guud ee labada dal, is dhaafsiga qibradaha sharci dajin iyo iskaashiga xiriirka labada Baarlamaan iyo dib u soo celinta xiriirka Soomaaliya iyo Ruushka.

kalmar kooban oo ay shirka ku daah-furtay Guddoomiye Valentino Matvienko waxay sheegtay sida ay uga go'an tahay dowladda Ruushku inay dib u soo celiso xiriirkii wanaagsanaa ee kala dhexeeyay Soomaaliya, ayna diyaar u yihiin inay garab istaagaan Soomaaliya dhinacyada dhaqaalaha, wax soo saarka, siyaasadda, waxbarashada, gargaarka bini aadanimo, tababarka ciidamada iyo qalabayntooda iyo amniga guud ee Soomaaliya, isla markaana ay ka shaqayn doonaan ay Soomaaliya u noqon lahayd dal amni ah oo isku filan.



Dhankiis Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa sheegay in xiriirka labada dal uu soo billaambay sanadkii 1964tii, xilligaas oo Midowga Sofiyeet uu kaalin wayn ku lahaa dhismaha dowladnimada Soomaaliya gaar ahaan tababarka ciidamada qalabka sida ee Soomaaliya, qalabayntooda iyo wax ka qabashada arrimaha bini aadanimo sida abaaraha iyo fatahaada isla markaana ay si muuqata uga qayb qaataan dhismaha iyo waxbarashada dhinacyadeeda kala duwan.

Guddoomiyuhu wuxuu sheegay in asaga iyo inta la da'da ah ay maskaxdoodu ka baxaynin kaalmadii midowga Sofiyeet ee abaartii Soomaaliya ku dhufatay 1974-1975tii markaas oo diyaarado laga soo diray Sofiyeetku ay dadkii dhibaataysnaa ka soo daabulayeen goobaha ay abaaruhu saameeyeen, una soo daabulayeen xeryo loo diyaariyay, gargaar ballaaranna u fidiyay.

Intaas kuma aysan ekeynin ee Midowga Sofiyeet wuxuu gacan ka gaysteen in shaqo abuur loo sameeyo dadkii aabaaruhu ku xoolo belay ee ku jiray xeryihii qaxootiga, iyagoo la siiyay agabkii ay ku shaqaysan lahaayeen, sida xoolo dhaqato, kalluumaysi iyo beeraleey, iyagoo ku garab istaagay sidii ay noloshoodu ku maarayn lahaayeen.

Guddoomiyaha Golaha Federaalka Ruushka ayaa sheegtay in Dowladda Ruushku ay haatan diyaar u tahay in da'yarta Soomaaliyeed ay u reebaan xasuus la mid ah tan duqayda Soomaaliyeed u leeyihiin garab istaagii Midowga Sofiyeeti, waxayna caddaysay sida ay uga go'an tahay Ruushku in dib loo soo nooleeyo xiriirka Soomaaliya lagana dhigo mid ku dhisan wax wada qabsi iyo iskaashi labada dal ah.

Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa sidoo kale uga mahad celiyay Dowladda Ruushka inay ka cafiyeen dayn ay ku lahaayeen Soomaaliya taas oo cadadkeedu kor u dhaafayo todobo boqol oo malyan oo doolarka maraykanka ah.

Gunaanadkii shirka, Guddoomiyuhu wuxuu mahad ballaaran u jeediyay Guddoomiyaha Golaha Federaalka ee Ruushka, ku xigeennadiisa iyo xubnaha Golaha sida diirran eey u

soo dhaweeyaan isaga iyo wafdigii la socday, wuxuuna sheegay in Ruushku yahay dal aan aan rabno inaan wax badan wada qabsanno, iyadoo Aqalka Sare ee BJFS uu diyaar u yahay inaan wada shaqeyno oon is dhaafsano khibradaha, iskana kaashanno baarlamaan goboleedyada iyo kuwa caalamiga ah ee aynu xubnaha ka wada nahay.

Guddoomiyaha iyo wafdigiiisu waxaa lagu soo wareejiyay soona kormeeray hoolka shirarka, waxaana lala wadaagay habmaamuuska fadhi ee hoolka iyo qaybaha uu ka kooban yahay hoolku.

Isla habeenkaas, Guddoomiyaha Golaha Federaalka Ruushku waxay xaflad sharafeed heer sare ah u samaysay Guddoomiyaha Aqalka Sare iyo wafdigiiisa.

KULANKA GUDDOOMIYAH AQALKA SARE IYO GUDDOOMIYAH GOLAH DUMA (DUMA STATE)

Subaxnimadii **03 Juun 2025**,

Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi oo booqasho rasmi ah ku jooga magaaladda Moscow ee dalka Ruushka, ayaa la kulmay Guddoomiyaha Aqalka Hoose (State Duma) ee Baarlamaanka Federaalka Ruushka Mudane Vladmir Volodin waxayna ka wada hadleen adkaynta xidhiidhka labada dal iyo wada shaqaynta labada Baarlamaan, iyadoo xusay inay muhiim tahay in labada Baarlamaan ay is waydaarsadaan khibrad isdhaagsi ku saabsan sharci-dajinta metelaadda shacabka.



Intaas ka dib labada Guddomiye ayaa isla qaatay in la sameeyo guddi saaxiibtinimo ah oo ay yeeshaan dowladda Soomaaliya iyo wadanka Ruushka, taas oo kor loogu qaadayo xidhiidhka soo jireenka ee ka dhaxeeya labada dal.

Ugu dambeyntii, Guddoomiyaha ayaa u mahadceliyey soo dhaweynta milgaha leh ee uu u sameeyey Guddoomiyaha aqalka hoose ee Baarlamaanka Ruushka isagoo tilmaamay muhiimada iskaashiga iyo wada-shaqaynta ay leeyihiin labada Baarlamaan ay sii xoojinayso xidhiidhka labada dal.

BOOQASHADA MASAJIDKA CATHEDRALKA MOSKOW

Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi iyo wafdigiisa waxay booqdeen masajidka cathedralka ee Moscow, waxaana ku soo dhaweeyay imaamka iyo khadiibka masajidka ahna ku xigeenka madaxa dalladda muslimiinta Ruushka Mudane Ildar Galeev.



Guddoomiyaha iyo xubnaha safarkiisa shaqo ku wahelinaayey waxay booqdeen qaybaha kala duwan ee uu ka kooban yahay masjidka isla markaana uga mahadceliyay imaanka sida wanagsan ee milgalaha leh ee ay u soo dhaweyeen maamulka masjidka.

Ugu dambeyntii, Guddoomiye Cabdi Xaashi ayaa kula dardaarmay maamulka masjidka sidii dadka loo soo bandhigi lahaa wanaagga ay leedahay diinta islaamka isla markaana loo bari lahaa bulsho weynta Ruushka.

KULANKA GUDDOOMIYAHA AQALKA SARE IYO WASIIR KU XIGEENKA ARRIMAHA DIBADDA, AHNA ERGEYGA GAARKA AH EE MADAXWEYNAHA RUUSHKA U QAABILSAN AFRIKA IYO BARIGA DHEXE

Galabnimadii 03 juun 2025, Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi iyo wafdigiisa ayaa kulan la qaatay Wasiir ku xigeenka arrimaha dibada dowlada federaalka Ruushka ahna ergayga gaarka ah ee Madaxwaynaha Dowladda Federaalka Ruushka Vladimir Putin ee qaabilsan arrimaha Afrika iyo Carabta Mudane Mikhail Bagdanov, iyagoo ka wada hadlay xidhiidhka soo jireenka ah ee u dhaxeeya dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladda Ruushka.

Wasiir ku xigeenka ayaa sheegay in Dowladda Federaalka Ruushka iyo shacabkeedu ay diyaar u yihiin in ay Soomaaliya garab istaagaan dhinacyada amniga, tababarka ciidamada, qalabayntooda, waxbarashada iyo siyaasadda isla markaana kor loo qaado deeqaha waxbarashada, tababarka ciidamada iyo in dib loo soo nooleeyo xiriirkii wanaagsanaa ee ka dhexeeyay labada dal.



GUDDOOMIYAHA AQALKA SARE AYAA KHUDBAD DHINACYO BADAN TAABANAYSA KA JEEDIYAY MEERTADA 591AAD EE GOLAHA FEDERAALKA RUUSHKA

Subaxnimadii 04 Juun 2025, sida uu ahaa jadwalka shaqo ee maalintaas, guddoomiyaha Aqalka Sare Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi iyo wafdigiisa waxay ka qayb galeen meertada 591aad ee golaha Federaalka (Aqalka Sare) ee dowladda Ruuska, waxaana soo xaadiray 161 xildhibaan.



Inta uusan guddoomiyuhu jeedin khudbadiisu, waxaa ugu horrayn kalmad soo dhawayn ah jeedisay Guddoomiyaha Golaha Federaalka Ruushka, iyadoo ka warbixisay xiriirkii soo jireenka ahaa ee labada dal iyo warbixin kooban oo ku saabsan guddoomiyaha Aqalka Sare ee BJFS ee martida ku ah kulanka, si muuqaal guud ay xildhibaannada iyo martida kale ee fadhisay kulanka.

Intaas ka dib, waxay codbaahiyaha ku soo dhawaysay Guddoomiye Cabdi Xaashi, hadal-jeedintiisa oo dhinacyo badan taabanaysay ayuu Guddoomiyuhu ugu horrayntii ku daahfuray taariikhda xasuustiisa ku jirta ee wax wada qabsi, kaalmo dhinacyo badan taabanaysay iyo sida uu ahaa xiriirkii Soomaaliya iyo Midowga Sofiyeet.. Sidoo kalena Guddoomiyuhu wuxuu sheegay muhiimadda ay leedahay sidii dib loogu soo celin lahaa xidhiidhka wanaagsan oo ay wada lahaayeen labada dowladood isagoo tilmaamay in Soomaaliya ay ka go'an tahay wada shaqaynta kor u qaadida xidhiidh wax ku ool ah oo ay la yeelato Dowladda Ruushka iyo in labada Baarlamaan isdhaafsadaan guddi saaxiibtinimo si looga wada faa'iidaysto khibradaha, korjoogtayn iyo sharci dajinta ee ay wadaagaan.

Dhanka kale Guddoomiyuhu wuxuu uga mahadceliyey Dowladda Ruushka in ay ka cafisay lacag boqolaal milyan oo ay ku lahayd Soomaaliya taas oo uu sheegay Guddoomiyuhu inay muujinayso mowqifka saaxiibtinimo ee Ruushka iyo sida ay uga go'an tahay ka



qayb qaadashada horumarka Soomaaliya.

Ugu dambeyntii, Guddoomiyuhu wuxuu uga mahadceliyey Marwo Valentino Metvienko casuumadda qiimaha badan leh isla markaana ay sharaf u tahay in maanta uu hor taaganyahay golaha Federaalka (Aqalka Sare) ayna tahay talaabo wanaagsan oo u horseedi karta in labada Baarlamaan xidhiidh toos ah oo wada shaqayneed yeeshen.

BOOQASHADA MATXAFKA DHEXE EE DAGAALKII 2AAD EE ADDUUNKA IYO TIYAATARKA BOLSHOY

Isla maalintaas, marka uu soo idlaaday kulankii meertada 591 ee Golaha Federaalka, Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi iyo wafdigiisa waxay booqdeen Matxafka Dhexe ee Dagaalkii labaad ee adduunka 1941–1945 ee ku yaal Moscow, Caasimadda Dowladda Federaalka Ruushka.



Intii Guddoomiyaha iyo wafdigiisa ay ku guda jireen booqashada ay ku tageen Matxafka waxa si diiran ugu soo dhaweeeyey maamulka Matxafka. Waxayna booqdeen qaybaha kala duwan ee uu ka kooban yahay haday noqoto agabyada qadiimiga ah ee wakhtigaas lagu dagaalami jiray iyo waxaana la tusay jaantus si fiican u muujinaya burburkii dagaalku gaystay.

Ugu dambeyntii, Guddoomiyaha iyo wafdigiisa waxa si kooban loogu sharaxay taariikhda uu leeyahay Matxafkaas, Waxaana yaalla qalabkii dagaal ee lagu dagaalamayay xiligaas, iyo xusuuso kala duwan oo muujinaya Waxyaabihii dhacay dagaalkii labaad ee Adduunka ee lagu jabiyay Naaziyiintii.

Fiidnimadii habeenkaas, xubnaha wafdigu waxay ka qayb galeen bandhig faneedyo kala duwan oo lagu soo bandhigay tiyaatarka bolshooy oo ay soo gudbinayeen ardayda machadka qoob-kacayaarka ee Moscow.

BOOQASHADII XUBNAHA WAFDIGA IYO DARJIINKA ZARDAYA PARK



Subaxnimadii 05 Juun 2025, xubnaha wafdigu waxay booqasho ku tageen darjiinka Zardaya oo ah jardiin casri ah oo ku yaalla bartamaha magaalada Moscow, agagaarka Kremlin-ka iyo webiga Moskva. Waxaa la furay sanadkii 2017, isla markaana ah meel dalxiis iyo nasasho caan ah oo isku leh dabecad, farshaxan, iyo tignoolajiyada. Beertan waxaa laga helaa dhir kala duwan oo iskugu jirta kuwa baxa cimilada kala duwan ee Ruushka, marinka la taaban karo ee hawada sare mara (Floating Bridge), hoolal bandhigyo casri ah lagu qabto, iyo goobaha daawashada muuqaalka magaalada. Zaryadye Park waxay tusaale u tahay is dhexgalka quruxda dabiiciga ah iyo horumarka casriga ah ee Moscow.

SAGOOTINTII WAFDIGA

Fiidnimadii 05 Juun 2025, Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BJFS iyo wafdigiisa waxaa sagootiyay marwo Lyudmila Skakovskaya oo ah Guddoomiye ku xigeenka Guddiga Sayniska, Waxbarashada iyo Dhaqanka ee Golaha Federaalka ee Baarlamaanka Federaalka Ruushka, iyadoo ka wakil ah Guddoomiyaha Golaha Federalka Ruushka waxayna u rajaysay guddoomiyaha iyo wafdigiisu safar nabad ah.



XUBNAHA WAFDIGA AQALKA SARE

- 1- Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi – Guddoomiyaha Aqalka Sare.
- 2- Sen. Leyla Nuur Maax – G/K/X Guddiga Garsoorka iyo Xuquuqul Insaanka
- 3- Sen. Ibrahim Awgaab Cusmaan - G/K/X Guddiga Dhaqaalaha
- 4- Sen. Maxamed Cabdi Cismaan – Xoghayaha Guddiga Amniga iyo Difaaca
- 5- Sen. Ayaan Aadan Cabdullaahi – Xoghayaha Guddiga Arrimaha Dibadda.
- 6- Sen. C/xakiim Macalin Axmed Maalin – Xubin Guddiga dhaqaalaha ahna G/K/X Guddiga dhaqaalaha ee Baarlamaanka Carabta.
- 7- Md. Cabdinaasir Ibrahim Guuleed – Xoghaye Guud
- 8- Md. Faysal Maxamed C/Karim – Agaasimaha Warbaahinta iyo Xiriirka dadwaynaha
- 9- L/Xle Maxamed Aadan Maxamuud – Habmaamuus

DHAMAAD